


FORWARD TOGETHER

# KU NOQOSHADA DUGSIGA 2021

**Mudnaan caafimaad waxbarasho, qof ahaan fasalka lagu qaadano oo arday iyo macallinta kasta oo PPS ka helayo waayo-aragnimo.**


Portland Public Schools



# Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan dugsiga ku soo noqon

**Qof ahaan, shan beri todobaadkii iyada oo ardayda PPS maalin dhan waxbarashadoodu qaadanaynaa Sanad-dugsiyeedka 2021-22.**

# Lakabyada caafimaad iyo tallaabooyinka nabadgelyo waxay inaga caawin doonaan kor u qaadista waxbarashada qof-ahaan lagu bixinayo PPS




✔ **Anaka oo sameyneyna tiro lakabyo caafimaad oo adag iyo tallaabooyinka nabadgelyada kana dhanka ah COVID-19, waxaynu sameyn ama samayn doonaa in waxbarashadu noqoto mid aan joogsi lahayn ardayduna fasalada ku qaadato sanad-dugsiyeedka oo dhan.**

✔ Waxaynu si adag u qaadaneynaa **hagitaanka tallooyinka caafimaadka dadweynaha.**

✔ **Khabiirada caafimaadka dadweynuhu waxay <u>isku raaceen</u>** iyada oo la isticmaalayo si wada jir ah talllaabooyink caafimaad si joogta ah inay ilaalinayso ardayda iyo shaqaalahaba

# Tallaaladda COVID-19



- **Tallaaladu waa dariiqa kaliya ee si waxtar leh loogu soo afjarayo xanuunka COVID-19.**
- **PPS waxay kor u qaadaa iyada oo abuureysa sidii loogu heli lahaa tallaalada COVID-19** qoysaska, ardayda iyo shaqaalaha dayrtani.
- **Waxaanu diirada saari doonaa dadaaladayada kor loogu qaadayo wacyiga iyo kalsoonida dhismayaasha ay joogaan dadka** qaatay tallaalada oo dhan inay khatartoodu hooseysa ama xanuunka daran ee laga qaado COVID-19.
- **Waxaan sidoo kale aqoonsanahay in hadda tallaalka COVID-19 loo ansixiyey kaliya dadka waaweyn iyo caruurta da'doodu tahay 12** iyadoo aan aad u sugeyno ansixinta caruurta ka yar 12 sanno.

## Hawlgalada iyo Tilmaamaha

**Tallaalada COVID-19 waa kuwo nabadgelyo ah waxtarna leh.**

Si aad wax badan uga barato dadaalada lagu horumarinayo helitaanka tallaalka COVID-19, booqo:

**PPS.net/COVID-19Vaccination**

FORWARD TOGETHER

# Af-Daboolka(Maaskarada)




- **Dhammaan shaqalaha(iyo shaqaalaha aan saaxiibada nahay) iyo ardayda K-12 waxa ay xiran doonaa af-daboolka** marka ay ku jiraan gudaha dhismaha iyo marka ay dadka ka ag dhow yihiin, iyada oo aan eegin xaaladooda tallaalka.
- **Af-daboolka waa in la xirtaa marka basaska iskuulka lala socdo.**
- **Af-daboolka looma baahan doono in la xirto marka hawlaha bannaanka lagu qabanayo;** haddaba, qofkii rabaa wuu xiran karaan af-daboolka marka aan looga baahneyn in la xirto.

## Hawlgalada iyo Tilmaamaha

Bishii Luulyo 29, Guddoomiyaha Gobolka Oregon Kate Brown waxay amartay hay'ada caafimaadka Oregon iyo Waaxda Waxbarashada inay sameeyaan xeer shuruud ka dhigaya in la xirto maaskarada marka gudaha iskuulada K-12 ee gobolka sanad-dugsiyeedka 2021-22, lana jaanqaado Xarumaha Xakameynta Cudurada Faafa ee dib u cusbooneysiiyey tilmaamaha la raacayo dhawaan kuna saleeyey sayniska xanuuka Delta ee faafaya.

**PPS waxay iminka haysataa in ka badan 1.7 malyuun oo maaskarada** kuwaasi la siin doono iskuulada.

# Kala Fogaanshaha





- **Saddex (3) fuudh ayey ardayda iyo shaqaaluhu isku jirsan doonaan** ilaa iyo intii suurtagal ah.

## Hawlgalada iyo Tilmaamaha

- **Sii wadista in la kala fogaado Waana inay is hortaagin waxbarashada waqtiga dhan ay dhammaan ardaydu fasaladooda ku qaadaneyso** (RSSL, p. 14)
- Masaafada ay miisasku inta badan iskuulada isku jiraan waxay noqon doonaan 3 fuudh, oo iska soo hor jeeda.
- Looma baahna in jid kaliya oo calaamadsan la maro.

# Marin Haweedka iyo Wareegooda





**Dadaaladda taya'da hawada gudaha waxaa ka mid ah :**

- **La sii wadayo sidii ay hawada dibada ee nadiifta ahi u soo gali lahayd.**
- Inay soo marto **hawadu gudaha iyada ka sii baxaysa bannaanka.**
- Nadiifinta hawada dib ugu wareegeysa gudaha iyada oo **fasal kasta iyo basaska iskuulka la dhigay filtarada shaandheeya hawada ee HEPA.**
- **Kor u qaadista filtarada MERV 13* hawada dhex wareegeysa** heer isku wada mid ah dhammaan iskuuladeena.

## Hawlgalada iyo Tilmaamaha

- Xeeladayada hawadu u socoto waxay ku salaysan tahay tilmaamaha **CDC** iyo Ururada Diiriyaasha Maraykan, Talaagadaha, iyo Injineerada Qaboojiyaasha (**ASHRAE**).
- Sida ku cad **Ururka Filtarada iyo Hawada Qaranka** , waa inay ku sumadeeyaan MERV 13, **filtaradu waa inay ku guuleysan karaan inay ka saaraan ugu yaraan 90% oo ah E3 walxo ah, 85% oo E2 walxo, iyo 50% oo E1 walxo.**

# Baaritaanka COVID-19




- **PPS waxa ay sii wadi doontaa inay bixiyaan baadhitaan xanuunka COVID-19** dhammaan iskuul kasta oo PPS ah.
- Baadhitaankani **waxaa loogu talogalay in laga baaro ardayda iyo shaqaalaha xanuunka.**

## Hawlgalada iyo Tilmaamaha

- "Baaritaanka Daaweyntu" waa baaritaanka ardayda ama shaqaalaha ay ka soo muuqdaan astaamaha marka uu iskuulka ku sugan yahay ama ay cid kale ku daarato xanuunka COVID-19 isaga jooga iskuulka.
- Kani waa **barnaamijka baaritaanka IHA/ODHS** ee la bilaabay bishii Janaayo 2021 iyada oo **100 boqol** ay iskuuladeena PPS isdiiwaangaliyeen.

# Iskaliyeynta iyo Kaarantiinka



- Caruurta ay ka **muuqdaan astaaamaha aasaasiga ah COVID-19 waa inay guriga joogaan** (iyada oo qoysasku ay tashadaan shaqaalaha caafimaadkooda ee daryeelka siiya).

- **Waxaan raaci doonaa tilmaamaha caafimaadka dadweynaha deegaanku bixiyaan** iyo shuruudaha ku saabsan habka loo raacayo iskaliyeynta iyo kaarantiinka COVID-19.

- Haddii jiro qof xanuunsan, **MESD iyo Waaxda Caafimaadka MultCo ayaa korka kala socon doona xiriiritaanka dabagalka iyo nidaamyada kaarantiinka.**

## Hawlgalada iyo Tilmaamaha

**CDC** waxay caddeynayaan tilmaamaha dadka qaatay dhammaan tallalada ee aan lahayn astaamaha COVID-19 uma baahan inay galaan kaarintiin marka uu ku daarto qof qaba xanuunka COVID-19.

# Gacmo Dhaqista




- **PPS waxay sii wadi doontaa inay bixiso saabuun diyaara, biyo iyo isbitiirto loogu talogalay in lagu nadiiyo gacmaha** taasi oo isbiirtada ku jirtaa dhan tahay ugu yaraan 60% .
- **Dugsigu wuxuu mudnaanta siin in gacmaha lagu dhaqo saabuun iyo biyo** ka dib marka ay ardayda ama shaqaaluhu ay isticmaalaan musqusha iyo maalintii oo dhan marba sida ku haboon.




## Hawlgalada iyo Tilmaamaha

- Fasal kasta waxaa yaala agabka gacmaha lagu nadiifiyo.
- Nadaafada Gacmaha & Habdhaqanka Neefasashada (SOP)
- Gacmaha oo si joogta ah loo dhaqo waa dariiqooyinka uu fiican ee lagaga jarayo jeermiska, ka taxadir inaad xanuunsato,kana hortag inaad ku fidiso jeermiska dadka kale . (RSSL, p.18)

FORWARD TOGETHER

# Nadiifinta Jeermiska



- **PPS waxa ay sii wadi doonaan inay hirgaliyaan nidaamyada nadiifinta oo joogtada ah dhammaan dhismayaasha dugsiyada degmada.** Waxaa fiiro gaar ah la siin doonaa shaqaalaha nadaafada inay nadiiyaan meelaha maalintii inta badan la taabo oogadooda.

- **Fasalka uu ka dilaaco xanuunka COVID-19 waxaa lagu sameyn doonaa in si dhammeystiran jeermiska looga nadiifiyo** iyo meelaha la xiriira iyada oo la raacayo tilmaamaha deegaanka iyo kuwa CDC.

- Basaska dugsiyada waxaa la nadiifin doonaa **maalin walba.**

## Hawlgalada iyo Tilmaamaha

**Nidaamayada Hawlgalada Caadiga ah ee PPS COVID 19 (SOP):**

- Nadiifinta iyo Jeermiska Laga Dilo Baabuurta
- Nadiifinta Iskuulada
- Dhaqida Miisaska iyo Nadaafadooda

# Waxbarashada iyo Tababarada




- Dugsiyadeenu waxay ugu addeegaan bulshadeena xarumo waxbarasho. **PPS waxa ay iskaashi la sameyn doonaan hay'adaha caafimaadka dadweynaha sidii ay ugu wacyi galin lahaayeen tallaalada COVID-19 iyo tallaabooyinka caafimaad ee la iskaga ilaalinayo COVID-19.**

- **Dhammaan shaqaalaheena iyo saaxiibadeenu waxay ka qeybqaadan doonaan siminaar ku baxaya online(wabiner) kaasi oo lagaga hadalayo xanuunka COVID-19 kuna siinaya xogihii ugu dambeeyey iyo tilmaamo cad oo la raacayo** si loo buuxiyo shuruudaha degmadu u dhigtay dhianca caafimaadka iyo nabadgelyada.ee la rajeynayo in la gaaro..

**Hawlgalada iyo Tilmaamaha**

Hay'ada Caafimaad iyo Waxbarashada waxay si adag tallo bixin u siinayaan iskuulada degmada "inay soo saaraan qorshayaal ay ku tababarayaan dhammaan shaqaalaha caafimaadkood iyo nabadgelyadooda dartood," iyo sidii ay ula xiriiri lahaayeen caafimaadka iyo nabadgelyada nidaamyada ardayda, qoysaska iyo bulshada." (RSSL, p 19)

# Qorshayaasha Nabadgelyada iyo Caafimaadka



## Waxaynu yeelan doonaa :

- Qorshe si **"Nabadgelyo ah Qof ahaan Waxbarashadii Fasalada loogu aato iyo Sii Wadista Addeegyada",** iyada oo la sharxayo xeeladaha lakabyadeenaee lagu yareynayo inaanu fidin xanuunka COVID-19. (OAR 581-022-0105)
- **Wararkii ugu Dambeeyey ee Qorshaha Maareynta Cudurada Faafa ee Bulshada,** iyada oo la sharxayo qorshayaasha hawlgalada degdega ah ee lagaga hadlayo cudurada faafa inta lagu jiro xaalada xanuunka. (OAR 581-022-2220)

# Booqdayaasha iyo Mutadawiciin

# Wada Joogista





**Booqdayaasha iyo Mutadawiciinta waa loo oggolaan doonaa** inta lagu jiro sanad—dugsiyeedka 2020-2021.

## Hawlgalada iyo Tilmaamaha


Dhammaan waxaa looga baahan yahay inan xirtaan maaskarada marka gudaha la joogo iyo marka dadka la joogto, iyada oo la eegin in aad tallaalan tahay iyo in kale; kuwa yeesha astaamaha xanuunka COVID-19 waa inay guriga joogaan.

Dhammaan booqdayaashadu waa inay saxeexan marka ay soo galayaan iyo marka ay baxayaan sidoo kale mutadawiciintu nidaamka maareynta.

Go'aanka ugu dambeeyey ee booqdayaasha iyo mutadawiciinta waxaa laga maamuli doonaa xafiiska maamulaha .



- **Dugsiyada Hoose waxa ay sii wadi doonaan inay isticmaalaan fasalada ay wada jiraan** ardaydu intii suurtagal ah.
- Fasalada la wada jiro lagama hirgalin doono **dugsiyada dhexe ama dugsiyada sarre.**
- **Xiiriirka iyo dabagalka ardayga waxaa lagu dhammeystiri doonaa xaadirtinta marka kasta oo uu fasal kale tago.**




**Waxaanu ahaan doonaa kuwa u dabacsanaan doono isbedelada tilmaamaha la raacayo, laakiin waxaanu si adag u raacaynaa tallooyinka khabiirada caafimaadka dadweynah, ee u addeega bulshadeena PPS .**



## Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan aragno ardaydayadii, saaxiibadayo iyo macallimiinta, maalin kasta Dayrtani!

FORWARD TOGETHER

Portland Public Schools